



## NIDAAMKA LA-TALINTA

Hawlaha Goobta 2024 - 2

**Nidaamka: Xiritaanka Codsiyada Dib-u-eegista Ikhtiyaariga ah ee BRC Sababtoo ah Jawaab-celin La 'aanta**

**Taariikhda Dhaqangalka ah:** Febraayo 1, 2024

Nidaamka isku-xirka: <https://www.mass.gov/doc/eec-closing-brc-discretionary-review-applications-due-to-non-response-policy-documentsomali/download>

### DULMARKA

Si loo dhaqan geliyo xeerarka hadda jira, EEC waxay dejisay nidaamka soo socda si loo hubiyo in musharrixiinta aysan ku sii nagaan ama aysan ku xirneyn barnaamijka in ka badan 120 maalmood iyada oo aan la helin ugu dambeynta Hubinta Diiwaangelinta Taariikhiga ah (BRC) ee go'aaminta ku habboonaanta ee EEC. Musharixiinta BRC ee sugaya, cusbooneysiinta, ku meel gaarka ah iyo/ama xaaladda shuruudda ah ee aan ka jawaabin cogsiga EEC ee macluumaaadka dheeriga ah 120 maalmood gudahood ayaa la siin doonaa go 'aan ku habboon "Aan Ku Habooneyn" sababtoo ah ku guuldareysigooda ah inay ka jawaabaan. Musharixiinta BRC ee horey ula soo xiriiray ruqsad bixiyahooda ama qaybta BRC iyagoo isku dayaya inay dhammaystiraan cogsigooda BRC waxaa la siin doonaa muddo kordhin 30 maalmood ah.

### CODSIGA:

Nidaamkani waxay khuseysaa dhammaan barnaamijyada shatiga iyo/ama maalgelinta ee EEC.

### WARBIXINADA MUHIIMKA AH

- Laga bilaabo Febraayo 1, 2024, dhammaan musharixiinta BRC ee weli ku jira sugitaanka, cusbooneysiinta, ku-meel-gaarka ah iyo/ama xaaladda shuruudda ah in ka badan 120 maalmood oo aan ka jawaabin cogsiga EEC ee macluumaaad dhere ah waxaa la siin doonaa go 'aan ku habboon oo ah "Aan Ku Habooneyn" sababtoo ah ku guuldareysigooda ah inay ka jawaabaan.
- Musharixiinta horay ula soo xiriiray midkoodna shati bixiyahooda ama qaybta BRC iyagoo isku dayaya inay dhammaystiraan cogsigooda BRC waxaa la siin doonaa 30 maalmood oo dhere ah oo ka baxsan waqtiga kama dambaysta ah ee 120 maalmood si loo dhammaystiro nidaamka dib-u-eegista ikhtiyaariga BRC. Haddii, ka dib muddo kordhin 30-maalmood ah, musharaxa wali uusan soo gudbin dhammaan macluumaaadka la cogsaday, waxaa la siin doonaa go 'aan ku haboon oo ah "Aan Ku Haboonayn."
- Dhammaan musharixiinta la siiyay go 'aanka ku haboon ee "Aan Ku Haboonayn" sababtoo ah ku guuldareysigooda inay ka jawaabaan mar dambe looma oggolaan doono inay ka

shaqeeyaan ama la xiriiraan barnaamijka la oggolaaday ee EEC iyo/ama la maalgeliyay waana in laga saaraa barnaamijka 14 maalmood gudahood.

- Dhammaan musharixiinta waxay heli doonaan warqad Aan Ku Habooneyn boostada ama imaylka oo qeexaya xuquuqda racfaanka ee khuseeya. Barnaamijyadu waxay heli doonaan warqad Aan Ku Haboonayn musharaxa iyada oo loo marayo Barta Barnaamijka Hagaha BRC ama Maareeyaha BRC ama, kiiska bixiyeyaasha FCC, imayl ahaan.

## **ILLAHA**

[Fadlan hubi hagaha ilaha ee EEC ee ku saabsan siyaasaddan](#). Haddii adiga ama shaqaalahaaga aad su 'aalo ka qabtid nidaamkan ama aad u baahan tahay taageero dheeri ah, fadlan la xiriir EEC Xarunta Xiriirka ee 617-988-7841.

## **DUUGOOBAY**

Tani waa nidaam cusub mana bedesho nidaam kasta oo hadda jirta ee EEC BRC.